Qoraal loo Adeegsanayo Kulan-Hawleedka

Maaraynta saamaynta Deegaan iyo Bulsho ee Waaxda Shidaalka: Adeegsiga Qiimaynta Deegaan iyo Bulsho si loo gaadho Horumar Waara

Waxa qoray:
Fernando D. Rodriguez
HSE International, LLC

Maaraynta saamaynta deegaan iyo bulsho ee Waaxda Shidaalka: Adeegsiga Qiimaynta Deegaaneed iyo Bulsheed si loo gaadho Horumar waara

Waxa qoray:
Fernando D. Rodriguez
HSE International, LLC

Fernando D. Rodriguez, April 2015
HSE International, LLC

Qoraalkani waa mid ka mid ah qoralaada saldhigga u ah Kulamada-shaqo ee uu qabanqaabiyo Bangiga Horumarinta Adduunka ee ku saabsan Habdhaqanka Caalamke ee la xidhiidha Tamarta iyo khayraadka la soo faqo oo ku lug leh ""Aqoon-kobcin ku saabsanMaamulka Khayraadka Shidaalka". Si gaar ahna waxa qoraalka loogu talo galay waa kullan soconaye maalin badhkeed oo ku saabsan "Arimaha Deegaan iyo Dhaqan ee la xidhiidha soo saaridda Shidaalka".
Qormadan waxa ay u qaabaysantahay sidan:

1. Hordhac
2. Saliidda iyo Gaaska: Samaynta mashaariic waaxeed iyo kuwa gaar u taagan
3. Saamaynta runta ah ee deegaan iyo dhaqan ee ay soo saaridda saliidda iyo gaasku leedahay
4. Qiimaynta saamaynta deegaan iyo Bulsho: qodobadaba salka u ah
5. Qiimaynta istiraatijiyadeed ee Deegaan iyo Bulsho: Fursad
6. Shuruudaha muhiimka aha ee la xidhiidha hay'adaha iyo sharciga iyo heshiisyada
7. Ka qayb-galka bulshada, hufnaanta, isla-xasaabtanka iyo xogta
8. Gacanka Soomaliya: tusaalayaal la xidhiidha caqabadaha taagan ee bulsho iyo deegaan
9. Koobis iyo Talooyin muhiim ah

1. Hordhac:

.
Labaatan dal oo Afrikaan ah ayaa sannaddii 2014 lagu daray liiska wadamada nugul. Liistadani waa mid sannad walba is baddasha. Inta badan dawalahadani waa qaar hodan ku ah khayraad tiro kuwan ka mid ahina (Jaadh, Koongo,Ayfarikoos, Koongada Diimuqraadiga ah, Siiraliyoon, Koortu Suudan, Suudaan, iyo Sinbaabwi) saliidda iyo shidaalku waa ka mid waxyaabaha ay dibadda u dhoofshaan, lix dalalkan ka mid ahna shirkado ayaa ka wada hawlo baadhitaan si loo helo kaydad cusub. Habdhaqan maamul liita oo la xidhiidha khayraadka dabiiciga, maamul xumo, iyo arimo ka taagan xuduudaha wadamadan ayaa laga yaabaa inay sii huriyaan xiisadaha, xoojiyanna sinnaan la'aanta, kana qaybqaataan xasaradaha iyo nuglaansha wadamadaas. Soomaaliya waa dalka labaad ee ugu horreeya dhanka wadadama nugul, taaso ka dhigan in uu ka soo rayay maadaama awal sannadadii hore loo aqoonsanaa dalka ugu nugul dunida

Istaraatiijiyadda Baanka Horumarinta Afrika ee 2014-2019 waxa u dajisan qorshe uu kaga qayb qaadanayo xoojinta adkaysiga dalalka nugul, oo ay ka mid tahay in diiradda la saaro sidii looga taageeri lahaa koboc loo dhanyahay oo loo marayo, xoojinta awoodda dawladda, dhiirigallinta u-dhannaanshaha dawladnimada iyo siyaasadda, sidoo kalena maamul wanaagga. Iyadoo isla markaana loo dhug yeelanayo sinnaan la'aanta raga iyo dumarka iyo amniga helitaanka cunnadda. (Jaantuska 1)
+

Figure 1: Contributing to Strengthening Fragile States



Source: African Development Bank, 2014-2019 Strategy.

Ganacsiga gaarka loo leeyahay ayaa noqon kara mid ka qayb qaata adkaysiga iyo degnaanshaha dal. Tan waxa sabab u ah in Ganacsiga gaarka loo leeyahay maarayn karo khataraha jira isla markaana ka faa'iidaysan karo meelaha deganaanshuhu ka jiro. Waxa kale oo uu ganacsigani abuuri karaa shaqooyin

Xukuumadaha ka qayb qaadan kara wada noolaanshaha iyo adkaysiga dalalkoodu waa kuwa leh aragtida loo baahanyahay, ballanqaad, qorshe sharci iyo mid hay'adeed iyo awood fulineed oo ay ku soo jiidan karaan maalgashiga ganacsiga gaarka loo leeyahay sameeyo. Xukummdahani waxay arimahan u sameeyaan si loo soo saaro khayraadkooda dabiicaga ah ee ay ka midka yihiin kaydadka saliidda iyo gaaska, looguna badali karo koboc dhaqaale oo loo simanyahay oo waara, fursado shaqo iyo cudud shaqaale oo gudaha ah, iyo nolosha muwaadiniinta oo la hagajo, Marka laga hadlayo heer mashruuc, habka qiimaynta saamaynta deegaan iyo bulsho waxa ay wax ka tari kartaa yaraynta saamaynta suuro-galka ah ee mashaariicda la qorsheeyo ee waaxda saliidda iyo gaaska ku leeyihiin deegaanka iyo bulshada. Sidoo kalena waxa ay xoojinaysaa maaraynta deegaanka iyo bulshada ee u gaarka ah mashruuc. Siwalba ha ahaatee, heer gobol ama dal, qiimaynta bulsho iyo deegaan ee Istaraatijiga ahi waxa laga yaabaa in loo isticmaalo in la saameeyo lana badiyo fursdaha laga helayo horumarinta waaxda saliidda iyo gaaska.Sidaa darteed, qiimayntani wax ay salka u dhigaysa horumar loo siman yahay oo waara, nabad iyo dhisme qaran oo ay helaan dawladaha nugul ee Afrikaanka ahi.

2. Saliidda Iyo Gaaska: Dejinta Mashruuc Iyo Mashaariicda Waaxda Saliidda Iyo Gaaska

Mashaariicda waaxda saliidda iyo gaaska waxa qayb ka ah marxalado kala duwan, hawlo baaxad wayn, kaabayaal iyo maalgalin u baahan tiknoolajiyad badan. Arimahan qaybta ka ah masshaariicdu waxay ka dhici karaan dhul ballaadhaan iyaga oo isla markaana soconaya muddo dheer.Marka si guud loo hadlo, waaxda saliidda iyo shidaalka waxa ay ka koobantahay wajiga hore oo ah sahaminta iyo soo saarridda, iyo wajiga danbe oo ah sifaynta, tafaariqaynta, samaynta gaaska dabiicaga ah ee hoorka ah, gaasta fudud, iyo warshadaha kiimikada iyo dufanka/xaydhaha. Mararka soo saarista shidaalku badantahay hawlaha waaxda waxa soo galaya maalgashi kharash badan oo lagu dhiso dhuumo ka qaada saliidda goobta laga soo saarayo oo gaadhsiiya meelaha ka fog ee ay ku yaalaan sifeeyayaasha iyo warshaduhu. Arintan

waxa lagu dhaqaaqaa marka la a go'aansado inay meelmar tahay iyada oo la eegayo suurogalnimada dhinaca dhaqaale.
Meerta-nololeedka hal mashruuc oo soo saariiddaa shidaalka ahi waxa uu qaadan kara muddo 30 sano ah, oo u dhiganta half fac, ha ahaado khayraadka la soo saaraya ceelal saliid ama gaas oo ku yaalla badda ama barriga. Muddadan bilaabantaa kiraynta/u-xidhista u samaynayo dalka marti galiyaha ahi iyada oo ay sidoo kalena ku jirto marxaladaha wadahadalada kirada, sahaminta, dhismaha, soo saarrida iyo joojinta iyo xidhidda (mashruuca)

Figure 2: Typical Oil and Gas Project Cycle



Noocyada qalabka uu baahanyahay mashruuca shidaal qodistu iyo rakibiddooduba (sida, kaabaddaa shidaal qodidda ee dhulka lagu dhiso mise kaabadaha shidaal qodidda ee badda laga dhex dhiso, qalabka warshadaynta iyo kaydinta saliidda caydhiin ee barriga laga soo saaro ama Qalabka soo saaridda iyo dajinta xammuulka shidaalka ee sabbaynaya ee badda) way kala duwantahay iyada oo ay ku xidhantahay khayraadka la soo saarayo waxa uu yahay, goobta khayraadka laga soo saarayo, iyo sida ay arintaasi suurogal u tahay marka laga eego xag farsamo iyo mid dhaqaaleba.

Horumar laga sameeyo marxaladaha ay marto soo saaridda saliidda iyo gaasku waxa uu ku xidhanyahay qodobada ay ka midka yihiin, suurogalnimada dhanka farsamada, kharakhka ku baxaya soo saariddda khayraadka, xaaladaha suuqa saliidda iyo gaaska (dhaqaalaha la xidhiidha horumarka), iyo jiritaanka duruufo wanaagsan sida (nabad, degenaansho, qodobo heshiis, qorshe cad oo haya'deed iyo mid sharci iyo xaalado la maaraynkaro oo oo la xidhiidha bulshada iyo deegaanka)

Korriinka waaxda gaaska iyo shidaalka iyo taabbagalkeedu waxa uu qaadan karaa tobanaan sano. Sida dhacda wadamada aan shidaal soo saarini waxay maalgashadaan hawlaha sahaminta iyo soo saaridda saliidda iyo gaaska. Dhanka kale, hawlaha qaybaha kale ee hadhay horumarintoodu waxay bilaabantaa kaliya haddii la helo maalgalin ganacsi oo ku filan. Hadaba maalgashiga hawlahani waxay iman kartaa haddii waaxdu taabbagasho iyo haddii la helo cudud ku filan iyo sidoo kale farsamo lagu taabbo galiyo hawlo adag oo la xidhiidha habka gaadhsiinta/qaadista, soo saarridda iyo isticmaalka waxyaaba laga sifooye iyo waxyaabaha laga sameeyo shidaalka

3. Saamaynta Deegaan iyo Bulsho ee dhabta ah ee soo saaridda saliidda iyo gaaska

Waxa jiray tobankii sane ee u danbeeyay horumar laga sameeyay dhanka tiknoolojiyadda la xidhiidha waaxda saliidda iyo gaaska iyo ka faa'iidaysiga waayo-aragnimada caalamiga ah.
Sidaas oo ay tahay hadana, waxa jira kala duwanansho xaga dunida ah oo la xidhiidha halbeegyada loo adeegsado qiimaynta hawlo isku mid ah. Sidoo kale kala duwanaanshahu waxa uu ka jiraa heerarka kala duwan ee baadhidda iyo soo saariddaa saliidda iyo gaaska. Kala duwanaanshani waxa uu ku xidhanyahay shirkadda hirgalinaysa iyo shuruudaha uu dajiyo dalka martigalinaya hawshaashi. Sidaa darteed, hal mashruuc ama mashaariic waaxeedyada la hirgalinayo marxalada kalaha duwan ee mashruuca soo saarka saliidd a iyo shidaalku –iyo sidoo kale saamaynta guud ee soo saaridda ayaa keeni karta is baddalo toos ah, kuwo dadban, qaar wanaagsan iyo qaar xunba oo ay ku yeelato deegaanka. Saamayntan ayaa ah ku dhacaysa deegaanka muuqda, kan dabiiciga ah iyo midka bulsho-dhaqan ee meesha laga samaynayo soo saaridda. Arintani waxay ay kordhin kartaa nugaylka

Hawlaha la xidhiidha " Wajiga sahamintu" waa kuwo soconaya muddada dhaw. Lagama yaabo in ay hawlahani horseedaan hawlo iyo horumar mudada fog ah. Hoos waxa ku qoran guudmar ku saabsan marxaladaha suuro –gal ah ee isku-xigxiga ee muhiimka ah oo ay yeelanayso mashaariicda la xidhiidha waaxda gaaska. Waxa sidoo kalene ku qoran nooca saamaynta laga yaabo inay keenaanan marxaladaasi/wajigaasi

- **Sahaminta-**Sahanka samayska dhulka. Hawshan, oo laga yaabo inay socoto dhawr bilood kuna xidhan nooca iyo inta uu gaadhsiisanyahay iyo meesha laga fulinayo sahanka, waxa loogu talo galay in laga helo xog sidoo kale sawirka qaab-dhismeedka dhulka [inta kahoosaysa oogada]. Sahankani waxa uu caawiyaa in la ogaado suurogalnimada in meel uu ku jiro shidaal. Sidoo kale xogtan waxa loo isticmaalaa in go'aan laga gaadho goobta laga yaabo inay noqoto bartilmaameedka qodaalka sahanka ah. Iyada oo ay meesha laga samaynayo ku xidhantahay, sahankani waxa ku lammaanaan kara saamayn deegaan mudada dhaw . Saamaynta waxa keeni kara jid-u-bixinta sahanka iyo yagleelidda saldhigyada , qaaca gaadiidka iyo qalabka hawl-galku uu hawada ku sii daayo, khalkhalka ka imanaya hawlgalka maraakiibta (ama aasaasidda saldhigyada xeelligga badda/ iyo halwgallada). Waxa la tixgaliyaa saamaynta arintaasi ku leedahay bulshooyinka ka ag-dhaw(sawaxan, habaas, socod gaadiid), saamaynta ay ku leedahay kaabayashaa jira, khatarka xanuunada lakala qaado ee ka dhalanaya isdhexgalka hawlwadeenada iyo bulshada degaanka, iyo saamaynta suuro galka ah ee ay ku yeelan karto raasamaaalka dhaqan iyo kan aasaareed . Siwalba ha ahaatee maadaama ay hawlahaani muddo gaaban soconayaan islamarkaana aanay markasta ku xigin dhismaha kaabayaasha shidaal qodista ama joogitaan hawlwadeenno, sahamintani waxa loo dhammaystiri karaa hab yaraynaya saamaynta isla markaana suuro galinaya soo celinta xaaladihii lagu jiray intaan sahaminta la bilaabin

.

- **Qodaal sahaneed** Ceelasha sahaminta waxa loo qodaa si loo hubiyo in khayraadka ku jira goobtaasi yahay saliid iyo inuuu yahay gaas. Marxaladan waxaa ku lammaan isbadal muhiim ah oo la xidhiidha hawsha iyo ujeedada qodista maadaama qodaalku u baahanyahay riigag, gaadiid xamuul ama maraakiib, baabuur iyo diyaaradaha qummaatiga u kaca oo daabula shaqaalaha. Qodaalka sahamintu waxa uu qaadan karaa dhawr bilood ama wakhti ka dheer(dhanka heshiiska, sahamintu waxay qaadataa ilaa saddex sano) waxa aanay u baahantahay dhismaha/qotominta kaabayaal (xarumaha gaadiidka, ceelal, iyo qalabka tijaabinta), iyo yaqleelidda saldhigyada shaqaalaha oo loogu talo galay muddada fog iyo agabka hawl-fududaynta iyo is-gaadhsiinta/gaadiidka. Iyada oo ay jirto khataro iman kara xilliga sahaminta dhulka, hadana saamaynta iman karta marxaladani waxay ku xidhantahay go'amada la qaato ee la xidhiidha arimaha ay ka midka yihiin goobaha loo asteeyo in qalabka la dhigo, habka dhaqdhaqaaqa,habka

wanagsan ee kaydinta iyo maaraynta qashinka, qaababka la xidhiidhi aasidda jajabka biraha, baahida loo qabo ololka ay sii daayaan dhuumaha ka kor taagan warshadaha salliiddu, iyo saamaynta bulsho-dhaqaale ee la xidhiidha nidaamka daabulka, joogitaanka ama soo kiraysiga shaqaale, oo ay ku lammaantahay is-dhaxgalka bulshooyinka ka garaba dhaw goobta. Waxa kale oo ah saamaynta arinta qodalka sahamintu ku yeelankarto ka faa'iidaysiga dhulka ama badda. Siwalba ha ahaatee, mar labaad marxaladani waxa ay leedahay bar bilaw, mararka qaarna ma keento in loo baahdo dhismaha kayd. Hasayeeshee waxa ka dhasha xidhidda qalabka ku meelgaadhka ah ee sahaminta loogu tala galay, ka tagidda ceelasha sahaminta iyo dib-u-hagaajinta goobahii laga fuliyay [sahanka]

- **Qodaalka qiimayta ah.** Haddii la xiqiijiyo in xaddi maangal ah oo saliid iyo gaas ah inay jiraan goob xilliga lagu jiro sahaminta, waxaa loo adeegsadaa qiimayn goobeed si loo go'aamiyo baaxaddaa iyo waxa uu yahay khayraadka la helay. Qodaalkani waxa kale oo uu suuro galiyaa in la helo xog farsamo si loo go'aansado habka ugu wanaagsn ee soo saaridda saliidda iyo gaaska. Saamaynta bulsho iyo deegaan ee suuro galka aha ee ku lammaan qodaalkan qiimayta ah waxay u dhigantaa saamaynta uu leeyahay qodaalka sahamintu.
  Qodaalka iyo soo saaridda: haddii ceelasha la qodo marxalladda qiimayntu ay muujiyaan jiritaanka xaddi saliid iyo gaas ah oo farsamo iyo ganacsi ahaanba meel mar ah, waxa markaa la diyaariyaa qorshe soo saarid oo loo gudbiyo maamulka arintaasi khusayso si ay u ansixiyaan. Waxa jira go'aamo kala gadisan oo la xidhiidha soo saaridda saliidda iyo gaaska. Iyada oo ay ku xidhantahay baaxadda kaydka marxaladani waxa ay qaadan kartaa tobanaan sano, oo ah ilaa muddada uu dhammaanayo khayraadku goobaha waxsoosaarkana la xidhayo.
  Baadhidda iyo soo saaridda saliidda iyo gaasku waxay u baahantahay muddo dheer, kaabayaal badan oo culus, farsamooyin horu-marsan, shaqaale joogto ah, tabobar iyo baraamij. Marxaladdan baadhidda iyo soo saaridda waxa jirta saamaytii la xidhiidhay marxaladda sahaminta iyo qodista qiimaynta ah mid la mid ah, inkasta oo ay la iman kaarto saamayn dheeraad ah, waxana jirta suuro galnimo ah in keento saamayn ururta.

  Sidaa darteedna, waxa loo baahanayaa in culays dheeraad ah la saaro hababka loo maamulayo wasakhda, shucaaca iyo adeegsiga kaabayaashii hore u jiray iyo arimo la mid ah. Waxa kale oo muhiim ah marxaladan in culayska la saaro saamaynta suuro galka ah ee qodaalka iyo soo saariddu ku leedahay halbeegyada la xidhiidha arimaha bulshada iyo dhaqanka. Arintani waxay timaadda marka ay jirto baahida ah in dhul la helo ama jid tegaya deegaan gaar ah oo la isticmaali doono muddo dheer(tusaale, xaaladaha qaar ayaa loo baahda in la helo dhul, dib-u-dajin qasab ah oo marmar timaada, jid-goyn iyo barakacin sababta burbur ku yimaada hababka dhaqaale ee bulsho). Wakhtiga dheeranayaana ee hawshani waxa uu ka dhigayaa bulshooyinka ka ag-dhaw[mashruuca] qaar ku waxyeeloba hawlgalka baadhista iyo soo saariidda, assaasidda nidaamka daabulka agabka / ama adeegga ee ku lammaan hawlaha lafdhabarta u ah mashruuca. Waxa kale oo arintani bulshooyinka u yeelan kartaa culays suuro gal oo soo fuula ka faa'iidaysiga dhulka iyo arimaha bulshada iyo dhaqanka.
  Intaa waxa dheer in inta lagu guda jiro hawshan ay iman karaan khataro la xidhiidha qalabka oo xumaada oo keeni kara(shil saliid daadasho, qarax, iyo dhacdooyin la xidhiidha badbaadada) oo dhammaan kordhinkara saamaynta. Ugu danbayn, inta lagu jiro marxaladan, dakhliga ka soo xerooda soo saaridda saliiddu waxa uu dib u soo gala dhaqaalaha dalka waxaana uu keeni karaa isbadal suuro gal ah. Saamayntan oo inta badan ah mid wanaagsan oo keentay koboc dhaqaale iyo daryeel bulsho. Hadaba haddii ay dhacdo in si wanaagsan oo loo simanyahay loo maamuli waayo dakhliga, waxa ka iman kara khalkhal dhaqaale, sicirbarar, iyo heerka nolosha oo aan isbadali waaya .

.

Soo-afjaridda iyo Xidhidda . Kaydadka saliidda iyo gaaska lama soo cusboonaysiinkaro. Ka faa'iidaysigoodu waxa uu leeyahay bilaw iyo dhammaad, muddo marka la joogana soo saariddu

way faa'iido darraysaa taasoo kama danbayta kallifta in la go'aansado in la joojiyo hawlaha lana xidho warshadaha. Arinta joojinta aiyo xidhiddu timaaddaa marka shidaalku uu noqdo mid dhaqaale ama badbaado darteed la soo saari kari waayo. Arintani waxay timaadaa dhammaadka meerta nololeedka ceel walba oo shidaal. Joojintu waxa ay ka koobantahay so af-jaridda hawlaha hab ilaalinaya dadka iyo deegaanka kana taxadiraya inay yimaadaan arimo saamayn xun ku leh daneeyayaasha degaanka, dawladaha iyo shirkadahaba.

Haddii aan shuruudaha xidhida aan la samayn bilawga soo saaridda shidaalka ,marxaladani waxay sidoo kale yeelan kartaa saamayn wayn (tusaale, qorshaha xidhida iyo dib-u-hagaajinta iyo dammaanad qaad maaliyadeed oo sax ah oo saamigal la ah xaddiga, saamaynta la filayo iyo baahiyaha loo qabo dibu-hagaajin iyo sidoo kale qiyaasaha bulsho-dhaqaale iyo hoosudhaca dhaqaale ee la socda ilaa dhammmaadka soo saaridda iyo dakhli abuurka)

Saamayta guud ama gaarka ah ee suuro galka ah ee hal mashruuc ka mid ah mashshaariicda soo saaridda saliidda iyo gaasku ay leeyihiin way kala duwantahay iyada oo ay ku xidhantahay waxyaabaha u gaarka ah mashruucaas iyo sidoo kale duruufaha bulsho-deegaan eek u xeeran – Saamayntuna waa mid si fiican loo qoro loona ogyahay

Ururada waaxdan, sida Ururka Caalamiga ah ee soo Saarayaasha Saliidda iyo Gaaska(IOGP), Ururka Waaxda Saliidda Iyo Gaaska Ee Arimaha Deegaanka Iyo Bulshada(IPIECA), Urur Goboleedka Shirkadaha Waaxda Salidda , Gaaska Iyo (Shidaalka laga sameeyo noolaha Biofuels) Ee Laatiin Ameerika Iyo Kaareebiyaanka(ARPEL), deeq bixiyayaasha sida Kooxda Baanka Adduunka, Barnaamijka Deegaanka ee Qaramada Midoobay (UNEP) iyo Ururka Caalamiga ah ee Dhawrista Deegaanka (IUCN); ururada kale oo ay ka mid yihiin Ururka Caalamiga ah ee Badaha(IMO), Machadka Batroolka ee Maraykanka(API), iyo Guddida Yurub ee Tamarta, kuwan iyo qaar kale ayaa waxay dejiyeen faafiyeenna halbeegyo iyo tilmaamayaal gaar ah oo ku salaysan habdhaqanka/farsamada u wanaagsan ee la xidhiidha soo saaridda shidaalka. Halbeegyada iyo tilmaamayaasha ay ansaxiyeen ururadani waa in la xoojiyaa, ayna qaataan shirkadaha isla markaana ay shardi ka dhigaan dawlahada martigalinaya si arintani wax uga tarto ka fogaanshaha in badan oo saamaynaha ka mid sidoo kale qaarkood la xakameeyo

4.**Qiimaynta Saamayta Deegaan Iyo Bulsho**: **Waxyaabaha Muhiimka Ah Ee Ay Qiimayntu Ka Kobantahay.**

Qiimaynta Saamayta Deegaan iyo Bulsho (QSDB) waa hab rasmi ah oo soo noqnoqonaya, taabanayana meelo badan sidoo kalena ah hab u baahan aqoon kala gadisan. Qiimayntan waxa loo adeegsadaa odoroska saamaynta (wanaagsan ama xun) ee uu mashruuc la soo jeediyay ku leeyahay horumarka guud ahaan. Qiimayntan waxa la sameeyaa inta la qaadan go'aanka ah in lagu dhaqaaqo mashruuca ujeedaduna waa in wanaajiyo naqshadda mashruuca ee ugu danbaysa.

Qiimaynta saamayntu waxay laga yaabaa inay tilmaanto goobta mashruuca laga fulinayo iyo - xalalka farsamo ee jira si wax looga badalo naqshada mashruuca taaso keenaysa in laga fogaado gabi ahaanba saamaynta arintaasi ku leedahay arimaha deegaanka, bulshada , caafimaadka, badbaadada, iyo dhaqaal ama in la yareeyo saamaynta iyadoo la gaadhsiinayo heer maangal ah, oo ay ka mid tahay odoroska goorta loo baahnaan karo magddhaw ku filan

Si kale haddii loo dhigo, QSDB- ma aha qoraaal ay soo saarto shirkad ama la-taliye, ayna ansixiyaan hay'adaha sharcigu kaliya si loo helo ogolaansho ka dibna khaanadda lagu ilaawo. Marka la qiimeeyo saamaynta macquulka ee tooska ah, saamaynta dadban , ha ahaato mudada dhaw iyo tan dheere ee uu leeyahay mashruuc la soo jeediyay, qorshaha QSDB haddii si sax ah loo dhaqan galiyo uu kana muuqdo marxaladaha dhismaha ee mashaariicda, waxa lagaa yaabaa in uu kor-u-qaado natiijooyinka ka soo baxaya mashaariic waarta oo la xidhiidha shidaalka iyo saliidda

Shuruudaha sharci, ha'adeed, maamul iyo ogolaansho ee gaarka ah ee uu QSDB leeyahay way ku kala duwanyihiin dawladuhu, hadana si guud waxa uu ka koobanyahay QSDB-gu tallaaboyinka ka muuqda Jaantus 3. Hoos waxa yaal sharax kooban oo la xidhiidha jaantuska. :

Figure 3: Typical ESIA Steps (in Green)



.

1. **Qeexidda Samaynta Mashruuca-** Hannaanka QSDB-ku waxa uu bilaabmi kara marka la helo xog bilaw ah oo ku saabsan dabeecadda, baaxadda iyo goobta mashruuca la soo jeediyay laga fulinayo(ha ku jiro mashruucu marxaladda mala-awaalka ama heerka dhisamaha aasaasiga ah), sidoo kalena go'aammada iyo dhammaan xogta hawl-gallada muhiimka ah ee dhaqan-gali kara marxaladdan la tixgaliyo lanaa dejiyo jadwal iyo wakhti.
   Waayo-aragnimada dadka kale ee la xidhiidha QSDB waxa uu ku talo bixiyaa in qeexidda mashruucu xisaabta ku darto mashruuca oo dhan oo ay ku jirto qodobadiisa dheeraadka ah, marxaladaha mashruuca oo dhan laga bilaabo dhismaha, hawlgalinta ilaa la gaadhayo soo-af-jaridda mashruuca ; Sidoo kalana qeexidda mashruucu waxa ay tixgalisaa dedaalada dhabta ah ee ee mashruuca hore u wadaya. Waxaa lagama maarmaan ah inaad ogaato in qeexidda mashruucu ay si meerta ah isku badbadalayso iyada oo ay sal u tahay natiijada iyo talabixinaha ka soo baxaya QSDB

2. **Kala-xulashada bilawga ah**- talaabadani, oo ku xidhan shuruudaha dal dhigto iyo sidoo halbeegyada hawlgal ee shirkadaha, waxa soo hoos galaya go'aaminta baahida loo qabo in la sameeyo QSDB-ka iyo heerka loo qiimayntani gaadhsiisantahay. Waxa kale oo soo hoos gali kara in la ogaado waxyaabaha dalka ka reeban.

3. **Xadaynta QSDB** : tallaabadani waad mid muhiim ah oo ka mid ah qorshaha QSDB waxa aanay la xidhiidhaa isha-ku-haynta hawlaha iyo dirasadaha xiga ee lagu samaynayo qaybaha ahmiyadda ugu wayn leh. Xadayntu waxa ay caawisaa in si bilaw ah loo sawiro qaybaha la filayo ee la xidhiidha saamaynta ama khatarka mashruuca ee

dhinac deegaan, bulsho, caafimaad iyo badbaado. Sidoo kale xadayntu wax ay qeexdaa baaxadda dhul ee diraasadda laga fulinayo iyo hababka la raacayo. Mararka qaar xadayntu waxa ay talo siisaa daneeyayaal kala duwan si hubaal looga dhigo in aragtiyahoodi lagu dhexdaray naqshada qorshaha QSDB. Waxa kale oo xadayntu sabab u tahay diyaarinta shuruudaha shaqada ee muujiya habka QSDB

4. **Xog Gogol dhig** ah- sida uu muuujinayo magucu xogtani waxa ay ina siinaysaa sawir dhakhso ah oo ku saabsan xaaladaha inta aan mashruuca la fulin waxayna sidoo kale abuuraan tixraaco lagu qiyaaso isbadalada ay mashaariicdu keenaan mustaqbalka. Arintani waxaa badanaa la socda diraasado lagu ururinayo ama lagu dheellitirayo xog walba oo loo arko inay dhimantahay ama wakhtigeedii dhacay.
   Marka la tixgaliyo waayo aragnimada ugu wanaagsan ee arintan la xidhiidha, waa in xogtani tixgalin gaar ah siisaa halbeegyada deegaan ee ka midka ah, haddii ay suuro gal tahayna ay tixgaliso xilliyada sidoo kalana tirooyin loo badalo natiijooyinka ka soo baxa diraasadda. Waxa kale oo muhiim ah in aqoonta dadka degaanka lagu daro xogta iyadoo laga qaybgalinayo hawshaha. Xogtani waa mid aan si kale lagu heli kareen.

5. **Qiimaynta Saamayanta Iyo Yaraynta Waxyeelada**- tallaabadani waa halbawlaha qiimaynta saamaynta. Xogta cilmibaadhista waxa loo adeegsadaa odoroska xaaladaha mustaqbalka waxii ka danbeeya mashruuca(ama marxalad ka mid ah marxaladaha mashruuca). Qiimaynta iyo yaraynta saamayntu waxay soo jeedisaa tallaabooyin lagu yarayn karo saamaynta xun (ama lagu sii hagaajin karo saamaynta wanaagsan)
   Tani waa talaabbo ka mid ah habka maaraynta QSDB-ka oo ay tusaalo ahan ka mid tahay, isbarbardhig lagu sameeyo shucaaca la filayo iyo halbeegyada arintaa u gaarka ah, ama shuruudaha adeegsi dhul oo suurogal ah oo labarbar dhigo adeegsiga dhulka ee haddaa iyo helitaanka dhul-waxa ayna ka caawisaa go'aan gaadhayaasha in ay sii horumariyaan mashruuca(tusaale… adeegsiga farsamo hoos u dhigaysa shucaaca, yaraaynaysa saamaynta mashruuca oo badalaysa naqshada si la isaga ilaaliyo arimo warwar leh).
   Talaabada qiimaynta saamayntu waa mid soo noqnoqonaysa, tixgalisa baaxadda saamaynta, iyo xaddigeeda, inta ay socoto. Sidoo kale waxa ay talaabadani ku dedaasha sidii tiro loogu badali lahaa ama loo odoroso in ay saamayntu iman karto iyo inkale. Hadaba xeerarka aasaasiga ah ee tallabadan waxa ka mid ah: in laga fogaado saamaynta meeshii suuro gal ah. Haddii saamayn aan laga baxsan karayn, waa in lagu yareeyo qaadista tallaabooyink lagu dhimayo waxyeelada . Hadaba haddii ay dhacdo in la qaato go'aan keenaya saamayn aan laga baxsan karin, waa in waxyeelada magdhaw laga bixiyaa.

   Habka qiimaynta saamaynta iyo yaraynta waxyeeladu sidoo kale waa marxalad ka mid ah hannaanka mashruuc dejinta halkaasoo baahida ugu badan ee jirtaa tahay in injineerada naqshadu ay kala shaqeeyaan kooxda qiimayta saamaynta " Qeexidda Mashruuca" oo aan ahayn arimaha baahida shaqada kaliya la xidhiidha laakiin sidoo kalena la jaan-qaadaya xaaladda bulsho iyo deegaan ee goobta mashruuca laga fulin doono.

   Arintani sidoo kale waa hawl kharsh dajin, isku miisaan iyo qiimayn dhaqaale, taasi oo ay muhiim tahay in la tixgaliyo qiimaha ay waxyeeladdu ku kici karto mustaqbalka (tusaale ahaan korodh ku imankara kharashka hawlgalka ama cadaadis ku yimaadda hababka waxka-qabadka wasakhda ee dibadda),haddii aan saamaynta la sii odorosay waxyeeladeeda lagu yarayn karin in kharash loogu daro qiimaha lacageed ee mashruucu ku kacayo intaan la hirgalinba(tusaale: isticmaalka tiknoolajiyadda yaraynta wasakhda oo horumarsan)

6. **Qorshayaasha maamulka iyo kormeerka**- Qorshayaasha maamul waa natiijo hawleedka ka soo baxda qorshaha QSDB. Qorshayaasha maamul waxa ay si cad u sheegaan siyaasadaha hagaya hawlgaladda, shuruudaha shaqaale iyo maaliyaadeed ee urur looga baahanyahay si uu u fuliyo tallaaboyin saamayn yarayn ah oo lagu tala bixiyay ama uu ugu hoggaansami laha tilmaamayaal, himilooyin, iyo halbeegyo loo dejiyay arintaa . Qorshayaasha maamul waa in aan kaligood la samayn balse lagu dhex daraa nidaamka maamul ee hawlgaladda shirkadda. Islamarkaana, qorshayaashu waa inay tixgaliyaan dejinta barnaamij kormeer iyo dabagal (oo inta badan baahan ogolaanshaha dalka martigalinaya), qorshahan oo waxkataraya hubinta in dhab ahaan saamaynta la filayaa ay la jaanqaadayso saadaasha la sameeyay- sidoo kalena tallaabooyinka yaraynta waxyeelada saamayntu yihiin kuwo waxtar leh. Tallabadan waxa loo qaadaa si loo hubiyo u hogaansanka halbeegyadii la isla-qaatay. Sida ay tilmaamayso khibradda dadka kale waxa ay dhiiri galinaysaa wada shaqayn dhaw in lala yeesho bulshooyinka ka ag-dhaw mashruuca oo ku xaq u leh in ay fahmaan inta ay leegtahay u hugaansanka qorshayaashu.

7. **Qorshaynta ka-jawaabidda xaaladaha degdega iyo kutalo galka**- Qorshayaasha Qiimaynta saamaynta iyo maamul waxay qeexaan xaaladaha iman kara iyo hababka lagu maaraynayo ee la socda halwgallada joogtada ah. Ha yeeshee, waaxda saliidda iyo gaaska sida mashaariicda kalaba ka dhacda, waxa jira dhacdooyin aan la filayn oo ka imanaya qalab shaqadiisii gabay ama dhacdo ka baxsan awoodda shirkadda ama dalka martigaliyay.
   Arintani waxay si gaara lagama maarmaan ugu tahay wadamada nugul oo ka-jawaabidda aafooyinka dabiiciga ahi aanay ahay qaar ku filan ama ay jiraan arrimo ka baxsan oo kordhinaya aafooyinkaa. Sidaa darteed, waa in aafooyinka iman kara lagu xisaabtamaa qorshayaala loo sii jeediyaa, lana sii tijaabiyaa hababka ka-jawaabidda xaaladaha degdega ah.Tusaale ahaan midka mid ah tallaabooyinkan waxay ku lug leedahay suurogalnimada daadasho saliid oo iman karta. Habab iyo hannaano waa in qorshaha lagu daro, lana bixiyo tababar si loo hubiyo inay jirto kartidii si dhakhso ah loogu xakamayn lahaa dadaashada(iyo dhacdooyin kale oo aan la sii qorshayn) ama heerka ugu hoseeyo la gaadhsiin lahaa saamynta aafada.

8. **Kaqayb-galka Bulshada-** QSDB waa fursad lagam maarmarmaan u ah kaqaybgal loo dhanyahay, kor u qaadista hufnaanta iyo isku xidhka aqoonta degaanka iyo khibraddaa dibadda, xoojinta taageerada la shaqaynta dadku u hayaan mashruuca laga yaabo in la fuliyo. In tashi lala sameeyo dabaqado kala duwan oo ah daneeyayaal ah gaar ahaan kuwa noloshooda ama hab-nololeedkooda u dhawyahay mashruuca suurogalka ah, ayaa ah arin wax ku tari karta in la abuuro xidhiidh wanaagsan oo ay la yeeshaan mashruuuca lana yareeyo suurogalnima in uu yimaado xidhiidh is-aaminaad la'aan iyo diidmo.
   Waayo aragnimada dadyawga kale waxa ay dhiiri galisaa in bulshadu qayb ka noqoto inta uu socdo QSDB, iyo marka la hawgalayo ee la maaraynayo sasmaynta deegaan iyo bulshob labadaba. Ha yeeshee, ka qayb-galka bulshadu waxa uu si gaar ah lagama maarmaan u yahay marxaladahan kala ah: marka la samaynayo xulashada mashruuca iyo xadaynta hawlaha mashruuca, marka saamaynta suuro-galka ah ee bilawga ah la – isla-garto, iyo marxaladda hirgalinta iyo la-socodka. Halkaa wax mar labaad lagama maarmaan ah in daneeyayaashu ka warqabaan sida uu hawlqabadku oo tixgalinayo qorshayaashii iyo halbeegyadii la-isla qaatay.

   Waxa kale oo qayb ka ah QSDB lagama maarmaarnimada in la tixgaliyo kooxaha nugul,sida reerguuraaga iyo dumarka, iyadoo fiiro gaara loo yeelano arimaha haweenka maadaama sinnaanta haweenka iyo xoojintooduba ay kaalin istiraatijiyadeed ka qaadato nabada iyo hannaanka qaran-dhiska.

5. Qiimaynta Istiraatijiyadeed ee Deegaanka iyo Bulshada (QIDB) : Fursad

Waxa suuro gal ah in la sameeyo QIDB si loo helo soo talobixin la xidhiidha siyaadaha, qorshayaada iyo barnaamijjyada hagi doona waaxda saliidda iyo gaaska iyadoo la eegayo xaaladaha deegaan iyo bulsho-dhaqaale-iyo iyada oo lala jaanqaadayo qoryashaal istiraatiyadeed ama ujeedooyinka waawayn. Marka si dhammaystiran loo fuliyo QIDB-ka xilliga loogu talo galay, waxa uu inaga caawinayaa ina aan xisaabta ku darsano maaraynta kharashaadka ku lammaan falgalka ay horumarinta waaxda shidaalka la yeelanayso xaaladaha bulsho, deegaan iyo dhaqaale ee ku xeeran hirgalinta.

.

QIDB-sho wuxuu kaga duwanyahay kan hal mashruuc leeyahay waxay tahay in qorshayaasha u garka ah mashaariicdu aan la tixgalinayn, badalkeedana waxa la sameeyo go'aamada gobal ama qaran ee waaxdu leedahay. Sidoo kalana istiraatiijiyadaha maamul ee heer hay'adeed ama siyaasadeed ayaa lasoo jeediyaa iyagoo u qoran hab natiija ah.

Marka arintu taagantahay dawlahada nugul, QIDB waxa uu kor-u-qaadi karaa isku-tiirsanaanta gobolada, abuuridda fursado koboc oo loo simanyahay loona dhanyahay, iyo maalgalin la sameeyo si loo ilaaliyo deegaanka iyo in la xoojiyo isku-tiirsananta bulshada, iyo hufnaan ka hir gasha deegaanada kala duwan ee Federaalka. Intaa waxa dheer in QIDB ay ka dhalan karaan talooyin la xidhiidha shuruudo iyo halbeegyo gaar ah oo la xidhiidha deegaanka, bulshada, shaqada iyo caafimaadka, iyo badbaadada oo u baahan in lagu daro heshiiska saliidda iyo gaaska ee ka dhaxeeya xukuumadda dalka ka talisa iyo shirkadaha saliidda iyo gaaska. Sida darteedna ay qaybka qaadanayso arintaasi kor-u-qaadista guud ee shaqada waaxda saliidda iyo gaaska. Marmarka qaarna, QIDB-ku waxa uu ku taliya in la sameeyo dib-u-habaynta hay'adaha si loo xoojiyo kaalinta ay maamulka deegaanku ku meelmarinayaan halbeegyo u gaar ah waaxda.

Hadday dhacdo in si wanaagsan loo adeegsado, QIDB waxa uu dhabbada u xaadhi karaa in la gaadho koboc dalku gaadho iyadoon wax culays dheeraad ah aan la saarayn khayraadka lana kordhinayn nuglaanshaha. Talaabdan waxay ku suuro galaysaa in la hirgaliyo waayo aragnimada dunida ee la xidhiidha waaxda si loo yareeyo daadashada lana hagaajiyo daryeelka bulsho inta laguu jiro marxaladaha kala duwan ee mashruuca. Jaantuska 4 waxa uu muujinayaa kala duwanaanshaha u dhaxeya Qiimaynta Saamaynta Deegaan iyo Bulsho(QSDB) iyo QIDB oo labaduba yihiin sababaha keena hawlqabad wanaagsan oo la xidhiidha arimaha bulsho-deegaan.

Figure 4: ESIA vs. Strategic Environmental and Social Impact Assessment

Jaantus 4. Isbarbardhigga Qiimaynta Saamaynta Deegaan iyo Bulsho iyo Qiimaynta Istiraajiyadeed ee Saamaynta Deegaan iyo Bulsho

Qiimaynta Saamaynta Deegaan iyo Bulsho(QSDB)	Qiimaynta Istiraajiyadeed ee Saamaynta Deegaan iyo Bulsho(QSDB)
Waxa diyaariya dadka mashruuca wada waxana dib-u-eega ansixiyana maamulka dawdladda	. Waxan gadhwadeen ka ah dawladda waxana loo adeegsadaa inuu xog-siiyo hannaanka dejinta hawlaha mudnaanta leh ee qaran iyo baahida loo qabo dib-u-habaynta la xidhiidha hay'adaha dawladda iyo siyaasadda
. Waxa uu ka jawaabaa talooyinka horumarineed ee la soo jeediyo	. Waxa uu ka hor qabsoomaa xogna siiyaa talooyinka horumarineed ee la soo jeediyo
Waxa loo adeegsadaa qiimaynta saamaynta horumarka la soo jeediyay ku leeyahay xaaladaha bulsho iyo kuwa dhaqaaleba	Waxa loo adeegsadaa in laqu qiimeeyo xaaladaha deegaan iyo bulsho-dhaqaale ay ku leeyihiin fursahada horumarineed iyo caqabadaha ka hor iman kara

Qiimaynta Saamaynta Deegaan iyo Bulsho(QSDB)	Qiimaynta Istiraajiyadeed ee Saamaynta Deegaan iyo Bulsho(QSDB)
Waxa uu ku lugleeyahay hal barnaamij ama mashruuc	. Waxa uu ku lug leeyahay degaanno, gobollo ama dhinacyo kala duwan ee horumarka ah
Waxa uu awood siiyaa aqoonsiga saamaynta mashaariicda u gaarka ah	Waxa uu awood u siiyaa dejinta qorshe guud oo lagu maaraynkaro saamaynta wanaagsan ama xun marka la eego gobolka iyo waaxda
Waxa uu leeyahay bilaw iyo dhammaad si fiican u qeexan sidoo kalena waxay diiradda saaraan si loo sameeyyo go'aamo gaar ah wakhtiyo gaar ah.	Waa hab loogu tala galay samaynta qorshe la xidhiidha jiritaanka si loo saameeyo go'aan-qaadashada muddo cayiman
Waxa uu diiradda saara yaraynta saamaynta xun iyo kur-u-qaadista saamaynta wanaagsan	Waxa uu diiradda saaraa sii wadidda heer la isla qaatay oo ah tayada deegaanka iyo xaaladaha bulsho-dhaqaale (Tusaale, aqoonsiga ujeedooyinka sii jiridda iyo xaddiga isbadal ee la ogolyahay
Waxa uu leeyahay aragti kooban waxana ku lammaan faahfaahin guud	Waxa uu leeyahay aragti ballaadhan waxana ka mid ah faahfaahin kooban si loo helo hiigsi iyo qorshe guud.
Dib-u-eegis xadidan oo lagu sameeyo saamaynta soo kordhaysa, oo inta badan ku kooban marxaladaha kala duwan ee mashruuca ama barnaamij gaar ah	Waxa qayb ka ah ku xisaabtanka saamaynta soo kordhaysa

(Source: Adapted from DEAT, 2004 and OECD, 2006)

6. Shuruudaha Hay'adeed iyo Sharci ee ugu muhiimsan iyo Heshiisyada

Dawladaha nugul waxay ay si gaar ah ugu nugulyihiin maamulxumo ku timaada arimaha deegaangka iyo bulshada iyo sidii hore loo sheegay saamaynta ay soo saaridda saliidda iyo gaasku ku yeelan karto deegaanka iyo bulshada. Maqnaanshaha sharciyo u gaar ah arimaha deegaanka iyo bulshada, yaraanta awoodda iyo hawlqabadka hay'adaha oo ka hor taagan inay ay u codsadaan shuruudo heshiis oo gaar ah waxay keeni kartaa heshiisyo iyo go'aan qaadasho liidata, iyo saamyn kale oo xun. Isla-socodla'aan ka dhaxaysa gobolada federaalka ayaa keeni kara khilaaf ku saabsan khayraadka ku jira xuduuddaha gobolada u dhaxeeya.

Wadamada nuguli kuma dayn karaan hawsha deegaanka iyo bulshada inay sameeyaan shirkaduhu. Waxay u baahanyihiin inay hormeeyaan si loo dajiyo qorshe adag oo cad oo la xidhiidha sharciga iyo xeerarka oo la jaanqaadaya gobolada Federaalka. Sharciga maamulaya soo saaridda shidaalku waxa uu u baahanyahay in uu qeexo baahida loo qabo in la dhawro hantida khayraad iyo tan bulsho. Sidaa awgeedna, waa in halbeegyo hawlqabad oo gaar ah lagu xusaaa heshiisyada shaqo. Tusaale ahaan, wadamada nugul waa inay dhaqan galiyaan shuruudaha ku xidhan in la sameeyo qiimaynta bulshada iyo deegaanka ama diraasadda saamaynta intaan la guda galin hawlaha shidaalka.
Wadamada nugule waxay sidoo kale u baahanyihiin samaynta maamul madaxbannaan oo aqoon leh loona xil saaro ansixinta iyo dabagalka QIDB iyo qorshaha maamulka hawlaha oo ay sidoo kalana dabagalaan u hoggaasanka . Maamulkaasi waxa uu bixin doonaa ogolaanshaha, fulinna doonaa xeerarka isagoo la kaashanaya maamulada kale ee dawladda, waxa uu sidoo kale fududayn doonaa xallinta khilaafadka iyo saamaynta suuro galka ah ee deegaan iyo bulsho, waxa aanu hubaal ka dhigi doonaa in qodoba ku filan(oo maaliyadeed iyo heshiisba) ay jiraan oo kuu saabsan soo-af-jaridda mashaariicda shidaalka iyo xidhidoodaba..
Waa in fiiro gaar ah loo yeesho si kor-loogu-qaado ahmiyadda ay leeyihiin wasaaradaha loo igmaday arimaha deegaanka iyo bulshada(sida, Wasaaraddaa Deegaanka, Wasaradda Daryeelka Bulshada, Wasaaradda shaqada iyo caafimaadka), ama la abuuro hay'ad ama

hay'ado loo xilsaaro arimaha bulsho, caafimaad, badbaado ee la xidhiidha waaxda shidaalka (sida, Hayadda Dhawridaa Deegaanka iyo Bulshada, iyo Hay'adda Caafimaadka, Badbaadada, iyo Deegaanka), waana in ay hay'adani noqotaa mid madaaxbannaan oo aan hoos iman Wasaaradda Batroolka.
Kama danbaytii, wasaaradda ama hay'addu waa in aanay awoodda saarin kaliya ka jawaab celinta codsiyada loo soo qorto iyo inay maamusho QSDB, laakiin waa in laga taageero dhammaystirka Qiimaynta Istiraajiyadeed ee Saamaynta Deegaan iyo Bulsho(QISDB) ee la xidhiidha soo saaridda saliidda iyo shidaalka ee gobolada Federaalka- si loo xoojiya istaraatiijiyadda qaran ee la xidhiidha go'aanada kala duwan ee soo saaridda saliidda iyo gaaska, oo ay ku jirto wakhtiga, mudnaanta, iyo in teegeerada sidii loo gaadhi laha koboc loo dhanyahay oo waara.

7. Ka Qayg-Galka Bulshada, Hufnaanta, Isla-Xisaabtanka Iyo Xog-wadaagga.

Ka-qaybgalka Bulshada, hufnaanta, iyo maamulka loo dhanyahay ayaa aasaas u ah dhismaha adkaysiga dal. Sida ku xusan qaybta 4aad, ka qaybgalka iyo tashigu waxay qayb muhiim ah ka yahay QISDB xataa marka lagu jiro marxaladaha ugu horreeya ee mashruuca. Habkani kaliya ma caawiyo yaraynta saamaynta degaan iyo bulsho maadaama uu tixgalinao aragtida iyo aqoonta dadka degaanka, ee waxa uu sidoo kale wax ku darayaa doodda taaso caawinaysa in horumarintu diiradda saarto arimaha wax ka taraya kor u qaadista nolosha dadka
Ururinta, maamulka, iyo wadaagga xogta la xidhiida khayraadka dabiiciga ahi waxay lagama maarmaan u tahay maamulka khayraadka wadamada nugul sababtoo ah hababkani waxay awood siiyaan go'aan gaadhayaasha, daneeyayaasha, iyo bulshada si loo gaadho go'aamo qumman oo ku saabsan taageersiga khayraadka dabiiciga ah si loo yeesho adkaysi

Sidaas oo ay tahay hadana, wadamo badan oo nuqul xogta muhiimka ahi ma jirto ama waa mid duugoowday. Marka la eego isbadalka socda ee dunida ee xaga farsamada casriga ah, wadamada nugul waxay haystaan fursad ah inay ka faa'iidaystaan tiknoolajiyadda iyo isgaadhsiinta si hore loogu gaadhsiiyo faca soo kacaya dhanka hufnaanta ee la xidhiidah ka faa'iidaysiga khayraadka dabiiciga ah.
Inkastooy jirto deganaansho la'aan, hadana 18% Somalidu waxay leeyihiin tilifoonka gacanta, waxa kale oo o la dhigay xadhiga fiber optic sannadii 2014 taasoo Muqdisho siisay intarnet xawaare sare leh. Inkastoo Soomaliya tahay 193 oo ah kan ugu danbeeya xaga adeegsiga isgaadhsiinta casriga ah arimaha la xidhiidha maamulka dawladda (eGov), hadana dawladda waxa suuro gal u ah inay tallaabo dheer qaado dhankan si loo haybsado hufnaan badan.

Tusaale ahaan , waxa jira fursado ay haystaan dawladuhu oo ah inay yagleelan madal furan oo xog lagu kaydiyo. Madashan waa in loo adeegsado bar laga dhaqaajiyo joogtaynta iyo hufnaanta la xidhiidha mashaariicda waaxda saliidda iyo gaaska arintaas oo ay soo hoosgalayso in si joogta ah loo cusboonaysiiyo xogta ku saabsan ,wareegyada qandaraas bixinta, iyo goobta laga dhisayo warshadda- Sidoo kale in laga heli karo madasha xog aad u faahfaahsan oo la xidhiidha miisaaniyadda, maamulka dakhliga iyo qoondaynta miisaaniyadda ee gobolada.

Strengthening Fragile States open data system would eventually also contribute to greater Government – civil society dialogue and accountability relative to the use of oil revenues as one of the measures for ensuring good governance in the sector.

Xoojinta nidaamka la xog furnaanta oo ay leeyihiin wadamada nugul ayaa aakhirka wax ka tari ballaadhinta dawladnimada- wadahadalka bulshada rayidka ah iyo la-xisaabtanka la xidhiidha ka faa'iidaysiga dakhliga oo ah mid ka mid ah tallaabooyinka hubaal ka dhigaya maamul wanaagga waaxda saliidda iyo gaaska.

8. **Gacanka Somaliya**: **Tusaalayaal La Xidhiidha Cagabadaha Jira Ee Xagga Deegaanka Iyo Bulshada.**

Daganaansha la'aanta iyo dagalada sokeeye ee mudduba ka aloosan Soomaaliya waxay keenneen baa'ba ku yimaadda deegaanka iyo dhibaabtooyin bulsho oo waawayn. Intaa waxa dheer in maqnaanshaha qorshe maamul dawladeed oo sax ah, sharci iyo xeerar iyo fulinteedaba iyo sidoo kale awoodda ka faa'iidaysiga khayraadka deegan ay intuba saamayntooda leeyihiin. Hoos waxa ku qoran qubane ah caqabadaha oo u baahan in si qoto dheer loo sii qiimeeyo lana tixgaliyo si dhakhso ahna loo maamulo iyadoo lagu salaynayo isla-falgalka suuro galka ah ee ay la yeelanayaan mashaariicda soo saaridda saliidda iyo gaaska

Arimo Bulsho-Dhaqaale

- In kabadan 1 million oo qaxooti ah una dhigma 10 % tirade dadka
- Xaalad ammaan oo liidataa, kaabayaal liita iyo khayraad maaliyadeed oo kooban
- Dhaqaalo ku tiirsan kaalmada dibadda iyo xawilaadda lacagaha
- Shaqola'aanta dhalinyaarta oo xoogan
- Adeegyada oo liita(waxbarashada iyo caafimaadka, iyo dhisida habnololeed waara)
- Kartda iyo xirfadaha oo hooseeya
- Nafaqadarro ba'an oo haysa kumanaan dhallaan ah
- Dhul-boob iyo isku-hallayn la'aan la xidhiidha xuquuqda dhulka iyo khayraadka dabiiciga ah.
- Ka faa'iidaysi xad-dhaaf ah oo ku aaddan khayraadka dabiiciga ah
- Hab dalgasho dhaqameedka sida dhir-garaaca iyo jabad gubka
- Adeegsiga aan la xadayn ee sunta cayayaanka iyo carro-nafaqeeyayaash/bacramiyaasha
- Hawlo kalluumaysi oo shacri darro ah.

:

Arimmo Deegaan

- Xaalufka dhirta iyo nabaadguurka carrada iyo baa'ba kaymahii dabiiciga aha
- Nabaad guurka carrada oo laga yaabo inay keento dhaawac aan laga soo kaban karin oo gaadha deegaanka
- Hayyaan iyo dabar go' ku dhacay duurjoogta
- Isku day la'aan in la dhawro lana maareeyo deegaanka dabiiciga ah iyo duurjoogta degaanka
- Noloshii badda iyo meelaha xeebaha ah oo dhibaato ba'ani gaadhay.
- Dhaawac wayn oo ka dhashay daadasho saliid oo aan la xakamayn amaba la soo sheegin..
- Dhaawac ay keentay saliidda oo ku dhacday geedaha mangrove, goobahii daaqa badda iyo shacabigii
- Maarayn xumada wasakhda (caagga, bullaacadaha, kuwa warshadaha iyo kuwa guryahaba)
- Ku aasidda/tuuridda sharci darrada ah(saliid, wasakh oo badhkood sunyahay) ee ay ku kacaan maraakiibta caalamiga ahi.
- Kaluumaysi sharci darro ah oo ay sameeyaan maraakiibta caalamiga ahi(gaar ahaan kuwa shabaaqda jiida ee laga leeyahay Aasiya iyo Yurub)
- Kala-duwanaashaha noolaha iyo dhawristiisa oo aan muhiim loo arkin
- Ka ganacsiga noocyada dhirta iyo xayaawanka nool
- Dikhawga hawada oo ay keentay magaalaynta iyo qiiqa ka baxa shidaalka/tamarta

9. **Koobis iyo Tallooyinka ugu muhiimsan**

Si kooban, wadamada nugul ee khayraadka hodanka ku hi waxay maraan marxalad lagama maarmaan u ah waayahooga danbe. Sida darteed taageero la siiyo iyo ka-

go'anaanshaha hogaankooda ayaa keeni kara ka faa'iidaysiga fursaddan laga helayo waaxda saliidda iyo gaaska si salka loogu dhigo maaraynta khayraad oo waarta, koboc loo dhanyahay oo dhanwalba leh, nabad iyo dhisme qaran. Si taa loo gaadhana waxa lagama maarmaan ah :

- In la sameeyo qiimayn istiraatijiyadeed oo la xidhiidha degaanka iyo bulshada si loo dejiyo halbeegyo muhiim u ah horumarin waarta oo lagu sameeyo waaxda saliidda iyo gaaska iyo in talo lagu yeesho dib-u-habaynta waaxda iyo hay'adaha ee loo baahanyahay, ayna ka mid tahay qodobadaba iyo shuruudaha la xidhiidha joojinta iyo xidhida mashaariicda shidaalk.
- In la dajo qorshe siyaasadeed xoogan oo la xidhiidha maamulka khayraadka dabiiciga ah iyo kan bulsho labadaba, oo ay ka mid tahay in waajib laga dhigo samaynta Qiimaynta Saamaynta Deegaan iyo Bulsho ka hor inta aan la gudo galin hawlaha, qiimayntan oo ay ansixin doonaan maamulku

- In la hubiyo isla-jaanqaadka iyo isku-dhigmidaa shuruudaha sharci ee la xidhiidha arimaha deegaanka iyo bulshada ee gobolada uu Federaalku ka koobnyahay

- In la sameeyo maamul adag oo loo xilsaaro ilaalinta hantida dabiiciga ah iyo tan bulsho, faafinta iyo meel-marinta hablbeegyada iyo sharciyada. Isla markaana la hubiyo in maamulkaasi la siiyo shaqaale iyo khayraad ku filan si ay u gaadhaan ujeedadooda

- Ina la hirgaliyo habab wadatashi oo loo dhanyahay si loo qiimeeyo dib-u-eegisna loogu sameeyo hannaanka qiimaynta deegaan iyo bulsho iyo sharicyiyada u gaarka ah waaxda iyo sidoo kale xeerarka maamula waaxda khayraadka dhullka hoostiisa laga soo saaro.

- In si tartiib ah lagu daro heshiisyada qaybo tixgalinaya sharikadaha gudaha si loo hubiyo in shirkaduhu iyo kuwa ku hawllan shaqadu ay ka qaybqaataan tabobarka iyo dhisida cudud shaqo iyo hababka qaybinta

- In la sameeyo madal laga heli kari xogta dawladdaa isla markaana diiradda la saro xog-wadaaga la xidhiidha qoondaynta heshiisyada, halbeegyada, miisaniyadda dawladda iyo in kama danbeynta oo in la gaadho qaybin iyo wadaag ku salaysan saamiqaybsi

- In loo isticmaalo dakhliga ka soo xerooda waaxda sidii loo dhisi lahaa hanti bulsho iyadoo la maalgalinayo addeegyada sida waxbarashada iyo caafimaadka, iyo qaybaha waxsoosaarka oo abuuraya fursado shaqo iyo fursado lagu horumarinayo nolosha dadka. Arrintaan oo suura galinaysa koboc loo dhanyahay oo loo simanyahay-lana tixgaliyo arimaha haweenka

- In si cad la isugu xidho qorshaha qaran ee horumarinta iyo taageerada deeqbixiyayaasha si loo gaadho meel ka saraysa hiigsiga loona dhiso adkaysi iyadoo si tartiib ah loo dhaqangalinayo Ujeedooyinka horumar waara waxii ka danbeeya 2015

Sources

Country Environmental Profile for Somali Peninsula, from 1st March 2006 to 31 August 2006: IUCN Eastern Africa Regional Office, Nairobi, Kenya.
http://www.eeas.europa.eu/delegations/Somali Peninsula/documents/more_info/country_environmental_profile_Somali Peninsula_en.pdf

African Development Bank: Addressing Fragility and Building Resilience in Africa: The African Development Bank Group Strategy 2014–2019.
http://www.afdb.org/fileadmin/uploads/afdb/Documents/Policy-Documents/Addressing_Fragility_and_Building_Resilience_in_Africa-_The_AfDB_Group_Strategy_2014–2019.pdf

African Development Bank, From Fragility to Resilience
Managing Natural Resources in Fragile States in Africa, 2014
http://www.afdb.org/fileadmin/uploads/afdb/Documents/Project-and-Operations/From_Fragility_to_Resilience_-_Managing_Natural_Resources_in_Fragile_States_in_Africa_-_Summary_Report.pdf

African Development Bank, Somali Peninsula Addendum to Country Brief: 2013-2015.
http://www.afdb.org/fileadmin/uploads/afdb/Documents/Project-and-Operations/2013-2015_-_Somali Peninsula_-_Addendum_to_Country_Brief.pdf

International Finance Corporation – World Bank Group Environmental and Social Performance Standards and Guidance Notes
http://www.ifc.org/wps/wcm/connect/topics_ext_content/ifc_external_corporate_site/ifc+sustainability/our+approach/risk+management/performance+standards/environmental+and+social+performance+standards+and+guidance+notes

Pollution prevention and abatement handbook 1998 : toward cleaner production
http://documents.worldbank.org/curated/en/1999/04/442160/pollution-prevention-abatement-handbook-1998-toward-cleaner-production

International Finance Corporation – World Bank Group Environmental, Health and Safety Guidelines
http://www.ifc.org/wps/wcm/connect/topics_ext_content/ifc_external_corporate_site/ifc+sustainability/our+approach/risk+management/ehsguidelines

World Bank Group, Towards Sustainable Decommissioning and Closure of Oil Fields and Mines: A Toolkit to Assist Government Agencies
http://siteresources.worldbank.org/EXTOGMC/Resources/336929-1258667423902/decommission_toolkit3_full.pdf

The global oil and gas industry association for environmental and social issues (IPIECA)
http://www.ipieca.org

International Association of Oil and Gas Producers (IOGP)
http://www.iogp.org/#*

European Commission - Energy
http://ec.europa.eu/energy/en/topics/oil-gas-and-coal

American Petroleum Institute (API)
http://www.api.org

Regional Association of Oil, Gas and Biofuels Sector Companies in Latin America and the Caribbean (ARPEL)
https://arpel.org

Copyright © 2015
Bangiga Caalamiga ah ee dib-u-dhiska iyo Horumarka/Bangiga Adduunka

1818 H Street, NW
Washington, DC 20433
Telephone: 202-473-1000
Internet: www.worldbank.org

Qoraallada Bangiga Adduunka waxa loo soo daabacaa sidii natiijooyinka Bangigu uu ka gaadhay hawlihiisa loola wadaagi lahaa bahda horumara sida ugu dhakhsaha badan. Hadaba qoraalka maqaalkan laguma soo diyaarin hab waafaqsan nidaamka saxda ah ee loo maro qoraalada sida rasmiga ah loo saxay/tafatiray. Ilaha la soo xigtay ee qoraalka waxa laga yaabaa in ay yihiin qoraallo aan rasmi ahayn oo aan si toos ah loo heli karaynin. Qoraalkan waxa soo saaray shaqaalaha ama la taliyayaasha Bangiga Caalamiga ah ee dib-u-dhiska iyo Horumarka/Bangiga Adduunka. Waxa ay heleen, sida ay u fasireen, iyo gunaanadka lagu xusay qoraalkani kama turjumayo fikirka Agaasimayaasha Fulinta ee Bangiga Aduunka aa dawlahada Bangigu uu matalo. Waxa ay gabi ahaanba yihiin fikirka qoraaga mana ah in sinaba loogu nisbeeyo Bangiga Adduunka, ama hay'adaha la xidhiidha, ama xubnaha gudida agaasinka fulinta ee dalalka ay matalaan.
Bangiga Adduunku ma damaanad qaadayo saxsanaanta xogta ku jirta qoraalkan mana qaadanayo masuuliyadda caqaaqib kasta oo kal dhalata isticmaalkiisa. Xuduudaha, midabyada, diimaha, ama xog kale oo lagu muujiyo khariirad kasta oo qoraalkan ku jirtaa ma sheegayso go'aanka Kooxda Bangiga Adduunka ee xaaladda sharcinimo ee dhul kasta ama ansixinta ogolaanshaha xuduudahaasi.

Xuquuqaha iyo Ogolaanshaha

Qoraalka maqaalkan ku jiraa wuu xafidan yahay. In min-guuriyo iyo/ama in qayb ka mid ah ama dhamaan qoraalkan la naqilo/raro iyada oo aan ogolaansh loo helin waxa ay noqon kartaa xadgudub sharciga arintaasi khusayso. Bangiga Caalamiga ah ee dib-u-dhiska iyo Horumarka/Bangiga Adduunku waxa uu dhiiri galiyaa baahinta shaqooyinka uu qabto waxana uu u siin doonaa ogolaansho in dib loo isticmaalo qaybo ka mid ah qoraalkan sida ugu dhakhsaha badan.

Waydiimaha xuquuqaha iyo rukhsadaha khuseeya, ee ay ka miy yihiin xuquuqaha qiima dhimista, waa in lagu aadiyaa Xafiiska cidda soo Daabacday ee, Bangiga Adduunka, 1818 H Street NW, Washington, DC 20433, USA; fax: 202-522-2422; e-mail: pubrights@worldbank.org.